

Lr:12

FAAFINTA



RASMIGA

الرسمية

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

ولاية أرض بونت الصومال

Alaabka 2aad

Garoowe 13 Disember 2000

Lr 12 biS

جريدة الشهرية

FAAFINTA BILWALBA KA SOOBAKDA

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland

Qaybta 1-aad: was Sh.So- 10,000 lamber walba Ruknaka Samadkii was Sh.So-170,000 dalaka  
dibaddana was Sh.So-500,000-Ruknaka la waydisto waqiga loo gooyay wixii ka  
jira ee qaybta 1-aad jansayo. Qaybta 2-aad: F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar was Sh.So-3,000  
Ruknaka iyo Qaybta 3-aad: waxaa la waydista Qaybta Masuulka Faafinta Rasmiga ah,  
waxaa lagu bixiyaa xafiiska aanahuraha boqiga ee Wasaarada Maaliyada.

**TUSMADA**

Qaybta 1-aad  
Sharci

Sharci Lr.18 ee 14/12/2000, kuna saabsan Horumarinta Jidadka & Gegooyinka  
Dayuuradaha.

Sharci Lr.19 ee 14/12/2000, kuna saabsan Mammucidda & Saaridda Miinada Iyo  
waxyaabaha garxa.

Sharci Lr.20 ee 14/12/2000, kuna saabsan Qaamunka Biyaha, Tamarta & Kheyraadka  
Dabuciga ah.

Qaybta 2-aad  
Xeer

Waxba ma leh





DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF  
SOMALIA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA

OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lam 19 ee 14/12/2000

Garoowe, Disember 17, 2000

Kuna saabsan qaanuunka mamnuucidda iyo saaridda miinada & waxyaalaha qarxa,

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

MARKUU ARKAY Axdiga Dawladda Puntland,

MARKUU TIXGELIYEY Ansixinta Golaha Wakiillada ee ku cad warqadda sumadeedu tahay GW/DPS/72/2000 ee taariikhdeeduna tahay Disember 13, 2000,

WUXUU SOO SAARAY

Qaanuunkan soo socda:

Qodobka 1<sup>aad</sup>.


Qaanuunkan mamnuucidda iyo saaridda miinada & waxyaalaha qarxa ee Dawladda Puntland waa la ansixiyey.

Qodobka 2<sup>aad</sup>.

Saddex nuqul oo qaanuunkan ka mid ah ee Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa asal (Original), waxaana lagu kala kaydinayaa Xafiiska Xoghaynta Madaxweynaha hal nuqul, Xafiiska Xoghaynta Golaha Wakiillada hal nuqul, Xafiiska Garyaqaanka Guud hal nuqul, waana lagu faafinayaa.

Qodobka 3<sup>aad</sup>.

Qaanuunkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyaan, Madaxweynuhuna saxiixo, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna qaanuunkani ka mid noqonayaa qawaaniinta dalka Puntland, qofkastana waxaa ku waajib ah in uu dhawro.

  
Cabdullaahi Yuusuf Axmed  
Madaxweynaha Dawladda



DOWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA



PUNTLAND STATE OF  
SOMALIA

Xafiiska Madaxweynaha

Office of the President

Qaannuun Lr \_\_\_\_\_

Date: \_\_\_\_\_

QAANUUNKA MAMNUUCIDA IYO SAARRIDDA MIINADA IYO  
WAXYAALAHA QARXA

MADAXWEYNAHA D.G.PUNTLAND

MARKUU ARKAY: Axdiga D.G. Puntland  
Qodobka 17aad  
MARKUU ARKAY: Sharci No 1 ee 30/03/99  
MARKUU ARKAY: Sharci No 5 ee 01/Janayo/2000

Isaga oo tix gelinaya talo soo jeedinta Agaasinka  
Guud ee Miina Saarka, Dhaqan Celinta iyo dib-udejinta


WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

**QODOBKA 1AAD**

Madaxweynuhu wuxuu mamnuucay miinada isticmaalkeeda, keydinteeda, soo saarideeda  
iyo ka ganacsigeeda.

**QODOBKA 2AAD**

Madaxweynuhu wuxuu ogolaaday, sahmintaa iyo saarida miinada iyo waxyaabaha kale ee  
qarxa, ee dhulka Goboladda Puntland.

  
Cabdulaahi Yuusuf Axmed  
Madaxweynaha Dawladda Puntland





DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF  
SOMALIA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA

OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lam 20 ee 14/12/2000

Garoowe, Disember 17, 2000

Kuna saabsan qaanuunka Hay'adda Biyaha, Tamarta & Khayraadka Dabiiciga

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

MARKUU ARKAY Axdiga Dawladda Puntland,

MARKUU TIXGELIYEY Ansixinta Golaha Wakiillada ee ku cad warqadda sumadeedu tahay GW/81/2000 ee taariikhdeeduna tahay Disember 15, 2000,

WUXUU SOO SAARAY

Qaanuunkaan soo socda:

Qodobka 1<sup>aad</sup>.


Qaanuunkan dhismaha iyo khidmadda adeegga ee Hay'adda Puntland waa la ansixiyey.

Qodobka 2<sup>aad</sup>.

Saddex nuqul oo qaanuunkan ka mid ah ee Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa asal (Original), waxaana lagu kala kaydinaayaa Xafiiska Xoghaynta Madaxweynaha hal nuqul, Xafiiska Xoghaynta Golaha Wakiillada hal nuqul, Xafiiska Garyaqaanka Guud hal nuqul, waana lagu faafinayaa.

Qodobka 3<sup>aad</sup>.

Qaanuunkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyaan. Madaxweynuhuna saxiixo, waxana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna qaanuunkani ka mid noqonayaa qawaaniinta dalka Puntland, qofkastana waxaa ku waajib ah in uu dhawro

  
Cabdullaahi Yuusuf Axmed  
Madaxweynaha Dawladda

